

U taagan difaacida iyo iyo hormarinta caafimaadka iyo deegaanka dadka reer Colorado

Ku socota: Waalidiinta/Masuuliyiinta ardayda ka diiwaan gashan dugsiyada Colorado

Ka socota: Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha iyo Deegaanka ee Colorado (Colorado Department of Public Health and Environment), Waaxda Talaalka

Ujeedo: Talaalka Tdap ayaa qasab ku ah ardayda galaaya fasalka 6aad

Taariikhda: 1da Maayo, 2020

Waalidka/masuulka ka
qaaliga ahoow,

Gobalka Colorado, ardayda galaaya fasalka 6aad waa in la marsiiyaa talaalka teetanada-gowracatda-xiiq dheerta (Tdap) kahor intaysan bilaabin dugsiga. Ka fiiri www.colorado.gov/pacific/cdphe/schoolrequiredvaccines.

Teetanadu waa cudur dhif ah, oon faafin oo keeni kara muruq gijjisnaan xanuun badan iyo adkaansho; dadka ayaa cudurka teetanada ka qaadi kara meel jirka ka go'ay ama dhaawac. Gowracatadu waa xanuun dhif ah, oo faafa kaasoo keeni kara dhibaatooyin dhanka neefsiga ah, wadno istaag iyo xanuuno kale oo khatar ah. Xiiq dheerta, ama kixda, waa cudur aad u faafa oo sababi kara qufac aad u badan, neefta oo qofka dhibta, iyo xanuuno kale oo daran, gaar ahaana ilmaha yaryar, kuwa socod baradka ah iyo dadka kale ee difaacooda jirku daciif yahay. Ilmaha da'da qaangaarka galay ee qaba xiiq dheerta waxay jirnaan karaan ilaa sadex bilood.

Ardayda jira 10 sano markay galayaan fasalka 6aad waxaa la siin karaa talaalka Tdap. Dhakhaatiirta qaarkood ayaa dooran kara inay sugaan ilaa ay ka gaarayaan 11 sano jir. Waalidiinta/masuuliyiinta ardayda galaaya fasalka 6aad ee aan la siin talaalka Tdap waa inay buuxshaan foomka sababta dhaafida talaalka ee caafimaadka la xariirta ama aan caafimaadka la xariirin si ardaygoodu uga qaybgalo dugsiga Colorado ku yaala. Booqo www.colorado.gov/vaccineexemption. Haddii aan ardaygaagu qaadan talaalka Tdap kahor intuuusan imaan fasalka 6aad ama uusan haysan faylka sababta loo talaali waayay, cunugaagu wuxuu noqonayaa mid aan raacin sharciga talaalka dugsiga ee Colorado looma ogolaanaayo inuu dugsiga dhigto.

Wixii su'aalo ah ama xog dheeraad ah, la xariir cdphe.dcdimmunization@state.co.us.